

Trichloroethylene (TCE) iyo Soo gelista Uumiga

TCE waxaa loo isticmaalaa soo saarida qaboojiyaha iyo iyada oo ah garaaso ka dhaqaha warshadaha. Waxa kale oo laga heli karaa alaabta macaamiisha, oo ay ku jiraan nadiifiyayaasha qaarkood, xaydha/garaasada, xabagta, qalabka wax lagu daboolo/lingaxa, waxyaabaha daryeelka alaabta guriga, iyo alaabada farshaxanka/hiwaayadda.

TCE:

- waa dareere ama gaas aan guban karin, aan midab lahayn
- waxay ku uumi baxdaa si fudud hawada
- ur macaan ayay leedahay marka ay tahay heerar sarreeya; heerar hoose marka ay tahay, ma leh wax ur ah
- waxaa laga heli karaa ciidda iyo biyaha dhulka hoostiisa ee lagu isticmaalo goobaha warshadaha, nadiifiyaha qalalan (dry cleaner)

Dadku waxay ka neefsan karaan TCE:

- Isticmaalka alaabada TCE ay ku jirto
- ka shaqaynta shaqo isticmaasha TCE
- uumiga ka yimaadda ciidda wasakhaysan ama biyaha dhulka hoostiisa mara ee soo gala hawada gudaha

Laga bilaabo Juun 2022, Minnesota waxay noqotay gobolkii ugu horreeyay ee xaddida inta badan isticmaalka la ogolyahay ee TCE. Mamnuucitaanku wuxuu khuseeyaa oo keliya xarumaha looga baahan yahay inay dawladda ka haystaan ogolaanshaha tayada hawada.

Walaac caafimaad oo ka yimaada ku neefsashada TCE

Soo gaarista ugu badan ee TCE ee ku timaada soo gelitaanka uumigu waa xaddi yar oo kuwaas oo ayna u badnayn inay keenaan saamayn caafimaad. Suurtagalnimada ah in ay saamayso caafimaadku waxay ku xirantahay qadarka TCE ee hawada ku jira iyo inta ay dhantahay muddada dadku neefsanayaan. Marka TCE uu soo galo jirka, qaar ka mid ah ayaa uga baxa neefsashada. Inta badan TCE-ga la neefsado ayaa loo soo nuugaa oo loo qaybiyaa jirka oo dhan iyada oo sii maraysa dhiigga oo si dhakhso ah jirka ugaga baxda kaadida.



Soo gaarista TCE ee siddeedda toddobaad ee ugu horreeya uurka ayaa waxay kordhin kartaa halista cilladaha wadnaha ee ilmaha. Inta badan, khatartan ayaa waxaa loo maleynayaa inay aad u hooseeyso bilawga marka haweenka ay la kulmaan TCE $\geq 20 \mu\text{g}/\text{m}^3$. TCE waxaa kale oo ay saamayn kartaa habka difaaca jirka; Khatar yar oo ay in ay saamayn ku yeelata habka difaaca ayaa laga yaabaa inay u jirto dadka si joogto ah muddo dheer ula kulma TCE $\geq 200 \mu\text{g}/\text{m}^3$. TCE waxa kale oo ay dhaawici kartaa habdhiska neerfayaasha, kelyaha, beerka, iyo habka taranka ee ragga.

Daraasado lagu sameeyay shaqaalaha iyo xayawaanka ku neefsada heerarka aadka u sarreeya ee TCE muujinayaan in soo gaarista muddada dheer ay kordhin karto halista noocyada kansarka qaarkood (kelyaha, beerka, iyo non-Hodgkin's lymphoma).

Qaddarka Baarista ee Soo Galitaanka TCE

Qaddrada/Xaddiga Baarista Soo Galitaanka (ISVs) ayaa loo sameeyay si loo muujiyo goorta tallaabo loo baahan karo si caafimaadka looga ilaaliyo soo gelitaanka uumiga. ISVs waa qadar badbaado u ah dadka in ay ku neefsadaan. Heerkani wuxuu difaac u yahay dadka u nugul, oo ay ku jiraan carruurta, haweenka uurka leh iyo dadka hore u lahaa xaalado caafimaad. ISVs ayaa waxay si aad uga hooseeyaan heerarka la filayo inay keenaan saamayn caafimaad. Marka ISVs la dhaafo, MDH waxay ku talinaysaa in la qaado tallaabooyin lagu dhimayo soo gaarista.

Waaxda Caafimaadka ee Minnesota
 Qaybta Qiimaynta iyo Latashiga goobta
 Taleefan: 651-201-4897; Email: health.hazard@state.mn.us
 Si aad macluumaadkan ugu hesho qaab kale, soo wac 651-201-4897.

Xaddiga	Qeexitaanka
2.1 µg/m ³	ISV Guryaha degaanka ah - heer badbaado leh oo dadka oo dhan ka ilaaliya in ay ku keento saamayn caafimaad.
70 µg/m ³	Qaddarka uumiga ciidda ee ku hoos jira sagxada hoosteeda ee Dhismayaasha Degaanka (33X ISV) - heer badbaado leh oo ah uumiga ciidda ka hooseeya ee guryaha
7 µg/m ³	ISV Goobta shaqada - heer badbaado u leh dadka laga yaabo inay kula kulmaan meelaha shaqada sannado badan.
230 µg/m ³	Qaddarka uumiga ciidda ee ku hoos jira sagxada hoosteeda ee Dhismayaasha Ganacsiga/Warshadaha (33X ISV) - heer badbaado leh oo ah uumiga ciidda ka hooseeya ee goobta shaqada

(lagu cabbiray microgram halkii mitir kuyuubik, ama µg/m³)